

Sida loo isticmaalayo barnaamijka Workforce One Connect App

In aad nala socoto waa sida aad uga hortagi karto inaan lagaa goosan manaafacaadka iyo adeegyada. Barnaamijka Workforce One Connect app waa caawimaad jeebka kuugu jirta!

- Isticmaal markaad rabto habeen iyo maalin mar kasta oo aad adigu u baahato!
- Lacag la'aan ayaa lagu helayaa oo si fudud ayaa loo isticmaali karaa app-kan.
- Waa la helayaa app-kan, xataa marka la isticmaalayo qalab caawimaad casri ah.
- Wuxuu ku shaqeynayaa iPhone, iPad, iyo taleefannada ama xalleefyada Android.
- Toos ayaad farriin ugu qori kartaa la-taliyeyaasha iyo shaqaalaha isku mar!
- Waxaad ka dirsan kartaa farriimahaaga manaafacaadka iyo adeegyada.
- Waraaqo aad sawiratay ayaad soo raacin kartaa farriimahaaga—oo waraaqo dambe kuma lumayaan boostada!
- Deegaankaaga ka hel caawimaad ah cunto, guriyeyn, xannaano, iyo wax kale.
- Lacag ah intarnetka taleefanka ayaa jiri karta, balse waxay ku xiran tahay qorshahaaga shirkadda taleefanka.



Barnaamijka Workforce One Connect App waa wax si fudud loo isticmaali karo

In lagula sameeyo kadin/koonto kuu gaar ah ka codso la-taliye ama shaqaalaha. Waa in aad haysato cinwaan boosto oo ah intarnetka (email address).

Kala soo deg app-ka meesha laga helo oo ah app store. Barnaamijkan oo ah app ku raadso ereyada: **Workforce One Connect**

Soo gal oo furo app-ka. Waxaad arkeysaa afar calaamad oo dhanka hoose kaaga muuqda:



Farriimaha



Macluumaadyo







Xiriirrada Dadka



Maareyn

Fariimaha


- Calaamadi  Santuuqa farriinta si aad farriin u qorto.
- Calaamadi  Qalinka oo qor cinwaanka farriinta dabadeedna bilow in aad qoroto farriintaada.
- Calaamadi magacyada la-taliyeyaasha iyo shaqaalaha aad farriinta u qoreysa, dabadeedna calaamadi OK.
- Calaamadi  Astaanta ku-darta ah si aad ugu dhejiso sawir ah waraaq. Waxaad ku soo dhejin kartaa sawir kuugu jira taleefanka, ama sawir ka qaado. Kaamaradda taleefankaaga ama xaleefkaaga ayaa toos kuugu shaqeyneysa si aad sawir uga qaaddo waraaqahaaga, haddii aad u baahato. Ka dib markaad sawir qaaddo, waad iska eegi kartaa si aad u xaqiijiso in ay tahay OK, dabadeedna sawirka ayaa farriinta ku soo dhagaya.
- Calaamadi  Fallaarta kor u jeedda si aad u soo dirto farriinta.
- Furo barnaamijka ah app-ka oo ka eego jawaabaha farriimahaaga.






Sida loo isticmaalayo barnaamijka Workforce One Connect App

Macluumaadyo


- Calaamadi  Macluumaadyo oo ah sawir aad ka heleyso cunto, guriyeyn, xannaano, iyo waxyaabo kale oo badan.
- Barnaamijka ah app-ka waxaad ka heleysaa macluumaadyo ah bulshada aad la nooshahay dhexdeeda, oo waxaa kuula socda macluumaadka xiriirka.



Xiriirrada Dadka

- Calaamadi  Xiriirrada Dadka si aad u aragto liiska la-taliyeyaasha iyo shaqaalaha ee Gobolka Minnesota.

Maareyn

- Calaamadi  Maareyn si aad u eegto liiska waxyaabo kale.
- Maareynta liiskeeda waxaad ku arkeysaa macluumaadkaaga iyo summaddaada.
 - Waxa kale oo aad ku sameysan karto waa app-ka inaad ka dhigato iftiin ama mugdi si ay caawimaad ugu noqoto isticmaaliddaada.

Isticmaalidda Workforce One Connect app, waxaa la xoojinayaa awood aad nagula socoto!

Barnaamijyada manaafacaadka iyo adeegyada ee Gobolka Minnesota ee isticmaalaya Workforce One Connect app



Barnaamijka Adult ee dadka waaweyn (Deeqda Gobolka iyo WIOA*)

Barnaamijka Adult Career Pathways (Helidda Shaqooyin Muddo Dheer ama ACP)

Barnaamijka Child Care Assistance Program (Cawimaadda Xannaannada Carruurta ama CCAP) oo lagu soo galay kiis ah barnaamijyada MFIP/DWP

Barnaamijyo Gaar ah

Barnaamijka yeelashada xirafad cusub ee ka dib shaqaa la'aan xirfad Hore ama Dislocated Worker Program (DW: State, DW Grants, WIOA*)

qof ah gurijooqe ama Displaced Homemaker

Barnaamij shaqo-helid oo ah afar bilood ama Diversionary Work Program (DWP)

Muhaajiriinta iyo Shaqaalaha Xilliga Beeraha la Goosanayo ama Migrant and Seasonal Farmworker (MSFW)

Barnaamijka Kaalmeynta Qoysaska Danyarta ah ama Minnesota Family Investment Program (MFIP)

Barnaamijka Minnesota Registered Apprenticeship Expansion at Depart. Of Labor and Industry ama dadka Minnesota u diiwaan gashan ee ballaarinta tababarka farsamada ee Waaxda Shaqaalaha iyo Suuqa-shaqada (MNRAE)

Barnaamijka haysashada shaqada ama RETAIN

Adeegyada Gobolka ee Dadka Indhoolaha ah Adeegyada Waayeelka (SSB SSU)

Horumarinta Shaqa-helidda ama SSB Workforce Development (WDU)

Tababarka Barnaamijka Shaqa-helidda Kaalmada Cuntada ee Danyarta ama (SNAP ET)

Trade Adjustment Assistance (Caawimaadda La-qabsiga Xirfadaha ama TAA)

Veterans and Homeless Veterans Programs ama Barnaamijyada Hoylaawaha iyo Halyeeyada Dagaalka (Vets and Vets-H)

Adeegyada Baxnaaninta Helidda Shaqada (VRS)

Youth Programs ama Barnaamijyada Dhallinyarada (MN, Youth at Work, TANF Youth and WIOA*)

*Workforce Innovation and Opportunity Act (Sharciga Xoojinta Shaqa-helidda Fursadaha Shaqaalaha)